

Xuquuqaha Sharciga Waalidka

Haddii aad tahay waalid haysta ilmo naafo ah, waxaad xaq u leedahay:

1. Inaad ka qaybgasho kulanada individualized education program (IEP, barnaamijka waxbarashada gaarka ah) iyo inaad soo bandhigto waxyaabaha uu xiiseynaayo cunugaagu.
2. In qof danahaaga difaacaaya ama khabiir kuu joogo kulanada IEP.
3. Inaad hesho nuqulka qiimeynta cunugaaga, inaad kasoo horjeesato, iyo inaad codsato qiimeyn waxbarasho oo madaxbanaan (IEE) oo aan wax kharash ah lagaaga qaadeyn.
4. Inaad warbixin qoran ka keento ilo ka baxsan dugsiga oo qayb ka ah hanaanka qiimeynmta.
5. Inaad aragto dhammaan diiwaanada waxbarashada ee ay ku qoran yihiin xogta cunugaaga iyo in lagu siiyo nuqulka IEP.
6. Inaad kasoo diido go'aanada kooxda IEP iyo inaad dalbato hanaan lagu xalinaayo khilaafaadka, oo ay kujiraan: codsashada kulan IEP ah oo hawl fududeyn, gudbinta cabashada ilmaha oo ka dhan ah Waaxda Waxbarashada Dhexe iyo Mida Dugsiga Sare, codsashada dhexdhexaadiye uu gobalku lacagtiisa bixinaayo, dalbashada dhageysi dacwo oo dhexdhexaad ah iyo racfaan ka qaadashada go'aanka dhageysiga maxkamada.
7. Inaad ka qaybgasho dib u eegista IEPs-da iyo go'aan kasta oo wax looga badelaayo hanaanka IEP-da, iyo sidoo kale inaad hesho Ogeysiis Hordhaca ah oo Qoran oo ku saabsan badelaada meeleynta waxbarashada cunugaaga ama bixinta waxbarasho bilaash ah oo habboon oo loogu talagalay dadwaynaha.
8. In cunugaaga laga qoro fasalka waxbarashada naafada ee ugu tayada wanaagsan iyo fasalka waxbarashada guud ee illaa xadka ugu habboon ee uu kasoo bixi karo.
9. Inaad hesho adeegyo si aad u barato xirfadaha hadalka ee wax ku oolka ah haddii heerka aqoontaada Ingiriiska ay xadidan tahay.
10. Inaad hesho waxbarasho dadwayne oo bilaash ah kuna habboon cunugaaga oo leh IEP-da loogu talagalay inay daboosho baahiyaha gaarka ah ee cunugaaga, oo ay kujiri karaan, laakiin aan ku koobneyn, waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xariira, sida adeegyada iyo aaladaha caawimaada bixiya ee teknoolajiyada; gaadiidka; adeegyada cilmi nafsiga, oo ay kujiraan maareynta habdhaqanada; daaweynta jirka; barashada xirfadaha shaqada; madaadalada, oo ay kujiraan madadaalada baxnaaninta; adeegyada talo-bixinta; oo ay kujiraan talo-bixinta dhaqancelinta; adeegyada hanuuninta iyo jihaynta; adeegyada caafimaadka dugsiga; adeegyada kalkaalisada dugsiga; adeegyada shaqada bulshada; tababarka iyo la-talinta waalidka; iyo, adeegyada caafimaadka ee la xariira baaritaanka cudurada ama ujeedooyinka qiimeynta.
11. Inaad maqal ahaan u duubato kulan kasta sida ku xusan Xeerka Waxbarashada Dadka Naafada ah ee Shaqsiyaadka Federaalka (IDEA) ama Qaybta 504 ee Xeerka Dhaqancelinta Federaalka ee soo baxay 1973.

Dukumiintigaan ma bixiyo wax xaq ah ama xuquuqo ka baxsan kuwa uu bixiyo sharciga dawlada federaalka ama kan gobalka waxaana loogu talagalay in loo isticmaalo ujeedooyin xog oo kaliya. Si aad u hesho xog dheeraad ah, la xariir Waaxda Waxbarashada Dugsiga Hoose/dhexe iyo Tan Dugsiga Sare, gaar ahaan Xaafiiska Waxbarashada Gaarka ah adoo kala xariiraya 573-751-0699 ama webrepliespeco@dese.mo.us.

Janaayo 1, 2010, waxaa dib u eegis lagu sameeyay Diseembar 29, 2021